

17-ka Maajo

Maalinta Qaranka Norway

17.maajo waa maalinta qaranka Norway. Waxaan u dabaaldegnaa in Norway ay heshay xeerkeedii u gaarka ahaa taariikhdu markii ay ahayd 17.maajo 1814. Ka hor 1814 Norway waxa ay in ka badan afar boqol oo sano ka mid ahayd Denmark. Xilligaas boqorka Denmark ayaa ahaa madaxa ugu sareeya Norway, dadka Norwiijiga ahna waxa ay ahayd innay raacaan sharciyada lagu soo go'aamiyo Denmark. Sannadkii 1814 wax badan ayaa ka dhacay Yurub oo Noorwiijiyiintu waxa ay rajeynayeen in ay noqdaan wadan gaar ah oo leh shuruucdiisa u gaarka ah.

Dastuurka waxaa lagu qoray Eidsvoll

Sannadkii 1814 waxaa ku kulmay Eidsvoll 112 nin si ay u qoraan dastuurka Norway. Waxa ay ka kale yimaadeen meelo kala duwan oo Norway ah . Kooxdan oo ay la jiraan dhammaan raggii waxaa loogu yeeray golaha boqortooyada, waxayna isticmaaleen todobo usbuuc si ay u qoraan dastuurka. 17-kii Maajo ayaa la dhameeyey dastuurka, waxaana saxiixay boqor Christian Fredrik, sidaa darteed waa maalintan tan lagu magacaabo maalinta qaranka Norway.




Maleriet heter Eidsvold 1814 og er malt av Oscar Wergeland. Kilde: Wikipedia

17. mai – somali

17-ka maajo waa maalinta calanka

17-ka maajo waa maalin fasax u ah ardayda dugsiyada iyo dadka waaweyn badankood. Waa maalinta calanka oo rasmi ah, taas waxaa laga wadaa in dhammaan dhismayaasha ay leedahay dowladdu ama degmadu, waa innay maalintaas saaraan calanka. Waxaa kale oo jira in badan oo shacab ah oo saara calanka 17-ka maajo. Calanka Norway waxaa la sameeyey sannadkii 1821. Waxa uu leeyahay midabada xorriyadda: guduud, caddaan iyo buluug. Iskutallaabtu waxa ay calaamad u tahay in Norway ay ahaato waddan masiixi ah.



Norske flagg, Foto: Vegard Ottervik på Pixabay



Det norske slottet. Foto: GK von Skodderheim Pixabay

Dhar xafladeed

Waa caadi in maalinta qaranka la xirto dharka ugu fiican. In badan waxa ay sidoo kale isticmaalaan dharka hidaha ama dharka kale ee qaranka.

17-ka maajo waxaa sidoo kale jira khudbooyin iyo xaflado lagu qabto dugsiyada, jardiinooyinka/beeraha lagu nasto ama magaalada hoose.

Saf-socod caruureed



Barnetoget i Oslo foran slottet. Kan du se kongefamilien på balkongen?
Foto: Wikimedia, Morten Johnsen



Blåruss og rødruss
Foto: Dimitri Valberg,

17-ka maajo waxaa sidoo kale lagu magcaabaa maalinta caruurta. Waddanka oo dhan caruurta iskuuladu saf-socod ayay socdaan, calanka ayey ruxaan, farxad ayey la qeyliyaan oo heesaan. Kooxaha muusikadana waa ay ciyaaraan. Maalintan dad badan ayaa ku heesa heesta qaranka “ haa, waa jecelnahay”. Qoraalka heesta qaranka waxaa sannadkii 1859 qoray gabayaagii caanka ahaa ee Bjørnstjerne Bjørnson. Sannadkii 1863 ayuu ina adeerkiis, Rikard Nordraak, qoray laxanka heesta qaranka.

Dabaaldegga qalinjebiyayaasha

Qalinjebiyayaashu waxa ay u dabaaldeggaan in ay dhammeeyeen dugsigga sare. Qaarkood waxa ay iskuul dhigteen 13 sanno. Qalinjebiyayaashu waxa ay xirtaan dharka qalinjebiyayaasha. Badanaa waxa ay iyaga oo isticmaalaya qalin, dharka isugu qoraan salaammo. Qalinjebiyayaashu waxa ay leeyihiin xaflado badan bisha maajo. In badan waxa ay leeyihiin baabuur ama basas u gaar ah kuwaas oo ay ku wareegaan oo ay ku ciyaaraan muusig cod dheer. Qaar badan sidoo kale waxa ay la kaftamaan macalimiintooda oo waxa ay soo kiciyaan xilli hore subaxda 17-ka maajo. Meelo badan waxa ay qalinjebiyayaasha aadaan socod u gaar ah halkaas oo ay niikiyaan/qoobka ka ciyaaraan, heesaan oo ay ku bandhigaan sawirro qosol leh.

Qoyska boqorka

Boqorka Norway waa lagu magacaabaa Boqor Harald, boqorrada waxaa lagu magacaaba boqorrada Sonja. Boqorka, boqorrada iyo qoyska boqorka intiisa kale waxa ay istaagaan balakoonka gurigga boqorka oo 17-ka Maajo kasta waxa ay gacanta u haatiyaan saf-socodka caruurta gudaha Oslo.

Saf-socodka caruurta waxa uu kor u aadaa wadada weyn ee Oslo oo lagu magacaabo jidka Karl Johan. Saf-socodku waxa uu maraa guriga boqorka, oo dhammaan caruurta iyo macalimiintu waxa ay gacmaha u haatiyaan/ruxaan qoyska boqorka. Qoyska boqorkuna dib ayey soo haatiyaan gacmaha. Waxaa jira in ka badan boqol iskuul oo ka qeyb qaata saf-

17. mai – somali

socodka caruurta gudaha Oslo.



Kongefamilien vinker til barnetoget i Oslo. Fra venstre: prinsesse Ingrid Alexandra, prins Sverre Magnus, kronprinsesse Mette Marit, kronprins Haakon, dronning Sonja og kong Harald